

Waxa ay ardayda Dugsiyada CCSD rabaan inaad ka ogaato kahortaga is-dilka

Bulshada Degmada Dugsiyada Cherry Creek,

Sebtembar waa Bisha Ka Hortagga Is-dilka ee Qaranka, ardaydeenuna waxay idiin hayaab arin muhiim ah oo ku saabsan sida aan uga wada shaqeyn karno badbaadinta nolosha

Ardaydeena yaa hogaaminaysa dadaalkaas. Arday ka socota dugsiyada sare oo dhan ee ku yaala Degmada Dugsiyada cherry creek yaa isu yimid si ay u soo saaraan fiidiyoow [aan caadi ahayn oo hada laga heli karo websaydkeena](#). Waa filim loogu talagalay waalidiinta iyo mas'uuliyiinta oo loo qorsheeyay in lagu wargaliyo, la baro, laga wada hadlo lagana daayo dhaleeceynta arimaha ku saabsan caafimaadka maskaxda, go'doominta iyo is-dilitaanka. Waxaan idinku dhiirigelinayaa dhamaantiin inaad daawataan filimkan, oo aad u adeegsataan sidii aad ula bilaabi lahaydeen wada-hadal iyo wada xaajood kuwa aad jeceshahay ee ku saabsan maadooyinkan.

Dugsiyada cherry Creek waxay leeyihiin taariikh fog oo ku saleysan inay daboolaan baahiyaha caafimaadka maskaxda ee ardaydeenna. Waxaan shaqaaleysiinay labo agaasime caafimaad oo heer degmo ah, kuwaas oo la shaqeyn doona lix isu duwayaal caafimaadka maskaxda ah oo u adeegi doona dhamaan bulshada oo dhan. Xirfadlayaasha caafimaadka maskaxda iyo kalkaaliyayaasha caafimaadku waxaa laga heli karaa dhisme kasta oo ku yaal dhamaan dugsiyada CCSD. Waxaan balaariinaynaa barnaamijkeena Calaamadaha Is-dilitaanka, kaasoo laga hirgaliyey dugsiyada sare in kabadan 10 sano. Sidoo kale dhisida awooda ardayda yaa qayb muhiim ah ka ah dadaalkeena kahortaga is-dilida ; Waxaan hirgalinay manhaj ila dugsiga dhexe K-8 kaasoo caawinaya hormarinta shucuurta, niyada iyo awooda ardayga. waana barnaamijka ay hogaaminayaan ardayda oo ay diirada ku saarayaan abuurida jawiga iskoolka ee wanaaga iyo taageerada, waxaa hada laga hirgaliyay dhamaan dugsiyada sare. Ardayda CCSD, shaqaalaha iyo xubnaha bulshada waxey fursad u helayaan isticmaalka barnaamijka khadadka ee Safe2Tell oo aamin ah, oo qarsoodi ah ay u wici karaan hadii ay dareemaan walaac xaga nabadgeyada ah.

Laakiin talaabooyinkan waa qayb kaliya oo ka mid ah xalka. Arintan waa arin saameyn ku leh bulshada oo dhan waxayna u baahan tahay xal guud oo bulshada ah. Waxaan kugu dhiirigelinayaa [inaad booqato qaybta ka-hortaga Is-dilka ee websaydka](#) si aad shakhsi ahaan u barato dhamaan adeegyada. Waxaan idinka codsanayaa inaad ka qeybqaataan wada-hadaladaan muhiimka ah ee ku aadan dadka kuugu dhow, ha noqdeen saaxiibadaada, xubnaha qoyskaaga ama kuwa aad taqaano.

Si ka badan sidii hore, waxaan u baahanahay inaan abuurno cod mideysan oo faham leh, naxariis iyo awood leh. Wadajir ahaan, waxaan isbedel ku sameyn karnaa nolosha qof walba oo kamid ah ardaydeena.

Si daacad ah,

Scott A. Siegfried, Ph.D.